# MACLUUMAAD
# KA CAAWINTA KIREYSASHO GURI

Guri dabaq ah ee Austria qiimahiisu waa ijaar iyo lacag carbuun ee amaanka.

## Kirada

Kirada waa lacagta aad bixinayso si aad u kiraysato guriga.
Waa in aad bixisaa kirada bil kasta.
Kirada waa isku mid bil kasta.

## Carbuunta ammaanka

carbuunta ammaanka wuxuu noqon karaa ilaa saddex bilood kiradooda.
Waxaad bixinaysaa carbuunta ammaanka hal mar oo kaliya: ka hor bilowga kirada.
Carbuunta waa lacagta ammaanka ee mulkiilaha.
Waxaa loo isticmaalaa dayactir laga maarmaan ah
Ama haddii aadan bixin kirada.

## Deynta carbuunta ammaanka

Ma haysataa lacag kugu filan ee carbuunta ammaanka?
Haddii ay tahay maya, gobolka Austria Hoose ayaa kaa caawin karaa.

Gobolka Austria Hoose ayaa ku deymin kartaa lacagta carbuunka ammaanka.
Tani waxaa lagu magacaabaa“ deynta lacagta carbuunta ammaanka”.
Waa in aad dib u bixisaa lacagtani, laakiin ma bixinaysid dulsaarka(ribada) deynta.

## Yaa heli karaa deynta carbuunta ammaanka?

- Dadka haysto dhalashada Austria.
- Dadka la siiyay magangelyo.

Dadka kale waa inay la xiriiraan maamulka.

## Deynta carbuunta ammaanka ma ahan suurtagal

- Codsadayaasha magangelyada.
- Dadka xuquuqda u yeeshay badbaadinta hoosaad
  Kuwani waa dadka aan la siinin magangelyo laakiin aan la masaafurin.

**Sideebaad ku heli deyn carbuunta ammaanka?**

Waa in aad soo gudbisato codsi**.**
Waxaad ka heli kartaa foomka codsiga barta intarnetka:

http://www.noe.gv.at/Gesellschaft-Soziales/Sozialhilfe/Sozialleistungen/Sozialhilfe_Hilfe_in_besonderen_Lebenslagen.html

**Fiiro gaar ah:** Waa in aad samaysaa codsiga wakhti ISLA MARKIIBA aadna u sugtaa in la ansaxiyo. Markaa ka dib ayaad saxiixi kartaa heshiiska kirada
**Ma heli kartid deynta carbuunta ammaanka haddii aad saxiixdid heshiiska kirada marka hore**

Buuxi foomka.
U dir codsiga maamulka saxda ah, kaasi waa

- Mas'uulka maamulka degmada
  Waa tee maamulka degmada, maamulka dowladda hoose, ama
- Degmada aad deggantahay,taas oo ah dowladda hoose

Maamulka ayaa go'aamiyaa haddii aad heli doonto deynta carbuunta ammaanka ama haddii kale.
Waxaad heshay deynta oo kaliya
Haddii aad u baahantahay caawin waa **halmar oo kaliya**.
Taas macnaheedu waa in aad **bixin kartaa kharashka noloshaada** markaa kaddib**.**
Waa in aad haysato lacag kugu filan oo aad ku istcimaasho kirada, korontada, cuntada, dharka iyo wixii la mid ah.

Deynta carbuunta ammaanka waa xaaddiga lacagta kaliya aad u baahanatahay.

Waxaa la bixiyaa oo kaliya **xaaladaha degdegga ah.**

Ma jiro xaq toos ah si aad u hesho deynta carbuunta ammaanka.

Maamulka wuxuu kaaga baahanyahay wax kala duwan.

**<u>Maxay tahay in aad samayso si aad u heshid deynta carbuunta ammaanka</u>**

- Waa in aad ka **jawaabtaa su'aalaha oo dhan.**
- Waa in aad keentaa dhammaan **dokumentiyada muhiimka ah.**
- Waa in aad u **sheegtaa** maamulka ku saabsan **hantidada** iyo **dakhligaaga.**
  Hantidaada waa wax waliba oo aad leedahay
  Dakhligaaga waa wax waliba aad kasbato oo aad heshid.

  Maamulka ayaa kula soo jiidi doono miisaaniyadda qoyska.
  Maamulka ayaa kula diyaarin doonaa warbixinta bulshada.
  Maamulka ayaa kugu soo booqan doonaa guriga.
- Waa in aad **nafsadaada** ka caawisaa hagaajinta xaaladaada.
  Waxaad bixin kartaa qayb ka mid ah carbuunta ammaanka, tusaale
  Waxaad ka caawin karaa guurista.
  Waxaad la hadli kartaa mulkiilaha haddii loo baahdo.

- Haddaad lacag dib ka hesho,
  Waa in aad u **sheegtaa maamulka**.
- Waa in aad sheegataa dhamaan foomamka kale oo ah gargaarka dhaqaale iyo taageerada aad xaq u leedahay tusaale, kaalmada kirada guriga, iwm.

**Yaa helaa lacagta?**

- Lacagta deynta carbuunta ammaanka waxay **SI TOOS AH u aadaa mulkiilaha**
- Waa in aad saxiixdaa **ballan qoraaleedka**
  Tani waxay caddaynaysaa in aad dib ugu bixisisid lacagta gobolka Hoose ee Austria.
- Waa in aad saxiixdaa **caddaynta shaqo.**
  Tani waxay caddaynaysaa in mulkiiluhu
  Uu dib ugu bixin doono lacagta gobolka hoose ee Austria marka aad ka guurtid guriga

**Sideebaad dib ugu bixisaa carbuunta ammaanka?**

- Waa in aad dib ugu bixisaa gobolka Hoose ee Austria lacagata deyndta carbuunta ammaanka haddii mulkiiluhu uusan bixin
  Ballan qoraaleedka waxay sharaxaysaa:
  Goorta iyo inta inta aad bixiso
  Marka aad ka guurayso dabaqa,
  Waa in aad dib u bxisid lacagta oo idil.
- Caddaynta shaqada waxay sharaxaysaa:
  In mulkiiluhu uu dib u bixin doono carbuunta ammaanka marka. aad guurtid
  Mulkiiluhu wuxuu si toos ugu bixinayaa carbuunta ammaanka maamulka.
- Mulkiiluhu **MA** bixin doono carbuunta ammaanka:
  * haddii aadan bixinin kirada
  * haddii dayactir loo baahdo
  * haddii aad wax jabisay.
  Marka, **waa in aad adiga dib ugu bixisaa carbuunta ammaanka gobolka hoose ee Austria**

**Digniin! Waa muhiim ah:**

- Waxaad guri kiraysan kartaa haddii aad bixin kartid kirada bil kasta
- Waxaad kiraysan kartaa guri haddii aay jirto heshiis kira guri.
  Haddii aysan jirin heshiis kira guri, waxaa jiri kara ugu yaraan dhibaatooyin la xiriira dakhliga damaanad qaadka.
- Fiiro gaar ah u yeelo waxyaabaha nidaamyada caymiska, TV, Intarnetka, talefoonka gacanta iyo gadashada. Waa in aad bixisaa tani bil kasta.
- Ha kharashgarayn lacag ka badan inta kuugu jirto koontaadaada.
- Isha ku haay bayca marka aad wax gadanaysid.
  Isticmaal dukaamo gacan labaad ah:
  Waxyaaba badan ma cusbo laakiin waa aay qiima jabanyihiin.
- **Bil kasta, hubi inaad bixiso kirada, tamarta iyo kululaynta ugu horeynta.**